

Hagidda Wadahadalka Qoyska iyo Daryeel Bixiyaha oo lala yeelanayo Aqoonahanada iyo Dugsiyada



Hal arin oo lagu ogaaday inay tahay mid aad u saadaalinaysa adkaantaaqrinta mustaqbalka ayaa ah taariikhda qoyska ee adkaanta aqrinta iyo horumarka luqadeed ([E2SSB 6162](#)).

Kahor intaadan la hadlin macllinka ilmahaaga, kooxda taageerada, ama shaqaalaha iskuulka, hubi inaad dugsiga canugaaga ka hesho maclumaad kasta oo khuseeya. Maclumaadka ku haboon waxaa ka mid noqon karamaclumaad ku saabsan waxyabaha soo socda:

- **Caafimaadka Dareenka Bulsheed:** Canugaaga ma dareemaa inuu yahay xubin qiimo leh oo ka tirsan bulshadafasalka?
- **Asbaabo Jir Ahaaneed:** Ma awoodaa canugaaga inuu wax arko wax maglo si ku filan si uu uga faa'iidaysto waxbarashada?
- **Soo Xaadirida iyo Anshaxa:** Dhibaatada akhris-qorista canugaaga sabab ma u noqon kartaa inuusanhelin waxbarashada?

Macallimiinta xanaanada waxay awoodaan inay dhisaan xiriira da laga sameeyey dhanka maamulidda WaKIDS

Hagidda Wadahadalka loogu talagalay Ardayda, Qoysaska iyo/ama Daryeel Bixiyayaashaka hor kulanka lala yeelanayo aqoon yahanada iyo shaqaalaha dugsiga:

Hoos waxaa ku yaal qaabab aad ubadkaaga uga qeyb galiso diyaarinta Wadahadalka Qoyska/Daryeelahaa Tani waa fursad loogu talagalay adiga inaad barato waxbadan oo ku saabsan khibrada canugaaga ee gudaha dugsiga.

- Waydii canugaaga maadooyinka ay ugu jecelyhiin iyo kuwa aysan jeclayn iyo sababta.
- Weydii ilmahaaga sida ay u arkaan macallinkooda iyo asaaggood. Ma dareemaan inay yihiin kuwa lagu taageeray oo lagu soo dhaweyay gudaha fasalka? Ma jiraan wax ay jeelaan lahaayeen in laga taageero oo ka baxsan shaqada dugsiga?
- Dib u eeg horumarka waxbarasho ee canugaaga, dhibcaha imtixaanka, iyo soo xaadiridiisa adigoo ka eegaya websaydka degmadaadaama dhanka ilaha maclumaadka ee kale
- Samee liis su'aalo ah oo aad hayso iyo mowduucyo aad rabto inaad kala hadasho macallinka. Ku dar waxyabaha ka caawin kara iyaga inay fahmaan caqabadaha ilmahaaga, awoodooda, iyo xiisahooda. Qeex waxa aad u aragto awoodda canugaaga una sharax halka aad u malaynayso in canugaaga uga baahan yahay caawimaad dheeraad ah.
- Ka fakar waxa aad uu sheegi kartid macallimiinta taasoo iyaga ka caawinaysa inay si fiican u fahmaan canugaaga, sida maadooyinka uu canugaaga ugu jecelyahay, xiisaha ama hiwaayadaha gaarka ah, xaaladaha caafimaad, xaalada qoyska, ama dhibaato kasta oo saamayn karta waxbarashada, soo xaadiridda, ama dhaqanka.



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

Hagidda Wadahadalka ee loogu talagalay Waalidiinta iyo Daryeel Bixiyahaasha*

Kuwani hoose waa su'aalo loo soo jeediyay qoysaska/daryeel bixiyayaasha si ay ugu adeegsadaan wadahadalkooda ay la yeelanayaanmacllinka canugooda iyo/ama dugsiga:

- Waa maxay rajooyinka heerka fasalka (heeraka waxabarasho)?
- Waa maxay qaabka ugu wanaagsan ee loo la xiriiro macallin ka?
- Sidee yahay canugayga? Ma jiraan wax aad jeelaan lahayd inaad ila wadaagto aniga oo ku saabsan wawa aad aragtay ee ku saabsan canugayga laga soo bilaabomarkii uu dugsiga bilowday?
- Sidee canugayga yahay bulsho ahaan iyodareen ahaan? Ma ka walaacsan tahay wax ku saabsan iyaga qaab kastaba ha ahaatee?
- Sidee qaabka ugu wanaagsan uga taageeri karaa dhanka horumarka bulsheediyo dareen ee marka la joogo guriga?
- Maxaa laga rajaynayaa canugayga inuu barto, ogaado, uuna sameeyo dhamaadka fasalkan, iyo canugayga ma yahay mid yool ah?
- Sidee dhibcaha canugaygaloo xisaabin doonaa?
- Canugayga ma leeyahay wax hawl ah oo laga rabo, haddii ay jiraan, fadlan ma i siin kartaa liiska hawlahaaas iyo waqtiga laga doonayo oo ay tahay inay gudbiyaan?
- Canugayga muxuu ku wanaagsan yahay, muxuuse canugayga la dhiban yahay? Ma isiin kartaa wax tusaalooyin ah?
- Sidee ku ogaan kartaa marka canugayga uu samaynayo horumar iyo marka ayu baahan yihiin caawimaad dheeraad ah?
- Maxaan samayn karaa si aan u caawiyoo canugayga?
- Ma jiraan barnaamijyo onlaayn ah ama adeegyo sidoo kale caawin kara canugayga?

***Waxaa laga soo qaatay dhanka (Waaxda Waxbarashada ee Magaalada New York) New York City Department of Education**